SHARUUCDAANI WAXAY QUSEEYAAN DHAMAANBA SHAQAALAHA KA SHAQEEYA XADADKA SEATTLE GUDAHEEDA, IYADOO AAN LOO EEGAYN QOF KA SHAQAALAHA AH XAALADIISA SHARCIGA SOCDAALKA AMA HALKA GOOBTA SHAQADA AY KU TAALO.

# Sharuucda Heerarka Shaqaalaha Seattle ee 2017

Hawlgalka Xafiiska Heerarka Shaqaalahu waa sidii lagu horumarin laha heerarka shaqada iyada oo si quman looga soo qeybgelinayo bulshada iyo ganacsatada, fulinta istaraatiijiga ah iyo horumarinta siyaasada cusub, ka go'naanta caddaaladda bulshada iyo jinsiyada.

Qoraalkaan waa in lagu soo bandhigo meel muuqata oo laga heli karo goobaha shaqada, isagoo ku qoran Ingiriis iyo luqadaha ay shaqaalaha ku hadlaan.

## SMC 14.19
## Mushaharka ugu yar

### WAXAY DEJISAA MUSHAARKA UGU YAR EE SHAQAALAHA

**Loo-shaqeeyayaasha Waaweyn**
(WAA KUWA LEH 501 SHAQAALE AMA KABADAN)

Loo-shaqeeyayahu wax ma ka bixiyaa qarashka caawinaada caafimaadka ee shaqaalaha shaqsiga?

| MAYA | HAA |
|---|---|
| **$15.00** SAACADIIBA | **$13.50** SAACADIIBA |

**Loo-shaqeeyayaasha Yaryar**
(WAA KUWA LEH 500 SHAQAALE AMA KAYAR)

Loo-shaqeeyahu ma bixiya ugu yaraan **$2.00** saacaddii oo ah dhinaca caawinaada caafimaadka shaqaalaha keliga ah iyo/ama shaqaalahu ma kasbada ugu yaraan **$2.00** saacaddii bakhshiish ah?

| MAYA | HAA |
|---|---|
| **$13.00** SAACADIIBA | **$11.00** SAACADIIBA |

**Xadka Loo-shaqeeyaha**
Waxaa loo xisaabaya wadarta tirada dhamaanba shaqaalaha adduunka oo dhan uga shaqeeya. Shabakadaha (franchises), waxaa loo xisaabayaa dhamaanba shaqaalaha shaqakadaas.

**Caawinaada Caafimaadka**
Shaqaalaha waa in lagu qoro heerka-silver ama qorshe sare sida lagu qeexay Xeerka Daryeelka la awoodi karo ee Federaalka (Federal Affordable Care Act).

» Loo-shaqeeye ma uu bixin karo mushahaaro hoos loo dhigay oo ah mida ugu yar haddii shaqaalahu diiday caawinaada caafimaadka ama aanu xaq u lahayn caawinaada caafimaadka.

## SMC 14.20
## Xatooyada Mushaarka

### WAXAY BADBAADISAA XATOOYADA MUSHAARKA

**Loo-shaqeeyayaashu waa inay bixiyaan dhamaanba/ magdhowga lagu leeyahay maalinta mushaar bixinta/ iyo waa inuu siiyo shaqaalaha macluumaad qoraal/ ah oo ku saabsan shaqada iyo mushaharka.**

**Warbixinta qoraalka ahna waa in lagu daraa:**

- Magaca iyo macluumaadka lagala xidhiidho loo-shaqeeyaha.
- Heerka mushaarka shaqada, xaq u yeelashada waqtiga dheeraadka ah, mushaarka saldhiga (saacaddii, xiligii, maalintii, toddobaadkii, gunada), iyo maalinta mushaarka la bixinayo ee joogtada.
- Sharaxaada siyaasadda bakhshiishka shaqada.
- Tixista bayaanka macluumaadka mushaarka ee ku saabsan maalmaha mushaarka.

**Tusaalayasha sharuudaha mushaarka:**

- Bixinta Mushaarka ugu yar
- Bixinta Mushaarka waqtiga Dheeraadka ah.
- Bixinta fasaxa shaqada
- Bixinta lacagta la ballan qaaday.
- Bixinta inta qofka uu shaqeysto
- Lacag bixinta baqshiishka la kasbaday.
- Dib ugu celinta kharashka shaqaalaha ku baxay.
- Ucadee shaqaalaha si sax ah in loo aqoonsado; si qalad ah inan loogu aqoonsan ama qandaraaslayaal.

## SMC 14.17
## Shaqo Fursado loo Siman yahay

### XADADYSA ISTICMAALKA DIIWAANKA XIRITAANKA IYO XUKUNKA

**Mamnuuca:**

- Waxaa mamnuuc ah in shaqabixiyaha uu kuqoro xayeesiinta in qof horay looxiray uu san buuxin karin shaqadiisa.
- Codsiyada shaqada ee leh su'aalaha ku saabsan diiwaanada xiritaanka iyo xukunada, haddii aanu loo-shaqeeyahuhu marka hore soo xulin codsayaasha leh sharuudaha ugu yar.
- Diiditaanka shaqada (ama ficilada togan ee shaqada) ee keli ahaan ku saleeysan diiwaanka xiritaanka.

**Xooga ka reebanaaya ayaa quseeya, oo ay ka mid yihiin, shaqooyinka ruuxu helayo kormeerid la'aanta carruurta ka yar 16, dadka naafada koriinka qaba, ama dadka waaweyn ee nugul.**

**Loo-shaqeeyayaasha waxaa laga doonayaa:**
Inay dib u dhigaan baaritaanka dembiyada ilaa iyo inta ay ka xulayaan soo codsadayaasha leh sharuudaha ugu yar.

Raacaan sharciyadaas ka hor inta aanay qaadin ficilo tigan oo kali ahaan ku saleeysan baaritaanka dembiyada:

» Siiyaan fursad uu ruuxu ku macneeyo ama ku saxo macluumaadka ku qoran baaritaanka dembiyada.

» Ku sii hayo booskaas inuu ahaado mid furan labo maalmood oo ganacsi.

» Uu hayo sababo macqula oo shaqada la xariira oo sheegay in haddii uu shaqaaleeyo ruuxaasi ay waxyeelayso ganacsiga ama uu raad ku yeelanayo awooda waxqabadka shaqada.

## SMC 14.16
## Bixinta Xiliga Xanuunka iyo Amaanka

### WAXAY U BAAHAN TAHAY FASAX LACAGA OO AH ARRIMO CAAFIMAAD AMA AMAANKA

**Loo-shaqeeyayaasha, waa inay siiyaan shaqaalaha mushaar xiliga uu ku maqan yahay fasax xanuun si ay u daryeelaan naftooda ama qoyska.**

**Waqtiga Jirada:** Xaalad caafimaadka korka ama maskaxda, oo ay ku jiraan balamada caafimaadka.

**Waqtiga Amaanka:** Sababo la xariira qalalaasaha qoyska, waxyeelitaanka galmada, bada socodka ama arrimaha nabadgelyada bulshada.*

**Qiimaha Xiliga Xanuunka iyo Amaanka (PSST)**

| | XADKA 1 | XADKA 2 | XADKA 3 |
|---|---|---|---|
| **Xadka Loo-shaqeeyaha** TIRADA GUUD EE SHAQAALAHA XILIGA BUUXA EE ADUUNKA (FTES) | **Ka badan 4 oo gaaraya ilaa 49** FTEs | **50 - 249** FTEs | **250+** FTEs |
| **Accrual ee PSST** SAACADAHA LA SHAQEEYAY | **1 saac** 40 SAACADOOD | **1 saac** 40 SAACADOOD | **1 saac** 30 SAACADOODBA |
| **Isticmaal oo sii wad PSST aan la istcimaalin** CAAWINAADA SANNADKIIBA | **40 saacadood** | **56 saacadood** | **72 saacadood**** |

*WAQTIGA AMMAANKA WAXAA KALOO LOO ISTICMAALI KARAA IN LAGU DARYEELO QOFKA GURIGA KULA DEGAN
**108 SAACADOOD SHAQAALAHA XADKA 3 OO LEH SHARUUCDA WAQTIGA LACAG BIXINTA (PTO)

**Loo-shaqeeyayaashu waa inay ku dhaqmaan sharuucdaan.**
**Ka-aargoosashadu waa sharci daro.**

**SOO SHEEG XADGUDUBKA**

Waxaad dacwadaada u gudbin karta Xafiiska Heerarka Shaqaalaha

*-ama-* Waxaad* dacwadaad u soo gubin karta maxkamada ka dib ama:

- Abriil 1, 2016 Loo-shaqeeyayaasha waawayn (50 ama shaqaale ka badan)
- Abriil 1, 2017 Loo-shaqeeyayaasha leh (50 ama shaqaale ka yar)

* DACWADA WAXAA LAGA QAADAN KARAA OO KALIYA MUSHAHARKA UGU YAR, XATOOYADA MUSHAHARKA & KU-XADGUDUBKA BIXINTA FASAXA WAQTIGA JIRADA IYO AMMAANKA.

**Adeegyo Qarsoodi iyo Bilaash ah**

- Baaritaanada Cabashooyinka.
- Shaqaalaha Fidinta.
- Cawinaada farsamo ee ganacsatada.
- Khayraad iyo U diritaano.

Afcelinta, turjibaanka luqadaha iyo qabanqaabo ayaa diyaara.

**(206) 684-4500**
seattle.gov/laborstandards

**OFFICE OF LABOR STANDARDS** 810 THIRD AVE, 3RD FLOOR, SEATTLE, WA 98104 (206) 684-4500 LABORSTANDARDS@SEATTLE.GOV **SAACADAHA:** 8 AM–5 PM (ISNIINTA - JIMCAHA) LA DAABACAY: 11/28/16